UNITED NATIONS NATIONS UNIES

Office for the United Nations Resident & Humanitarian Coordinator for Somalia

Hay'adaha gargaarka Soomaaliya oo u gurmanaya dadka rayidka ah ee bara-kacay iyo baahida deg-degta ah ee Muqdishu

(Nairobi, 26 September 2008) inkastoo ay xaalad ba'an oo dhinaca ammaanaka ah ay jirto, haddana hay'adaha gargaarka Soomaaliya, ayaa sii kordhinaya dadaalkooda ee ku wejahan gurmadka dadweynaha tabaalaysan ee ku dhaqan Muqdishu iyo nawaaxigeeda, kaddib markii gantaalo culculs iyo dagaallo la isku weydaarsanayey in ka badan muddo shant maalmood ah. Dagaaladaas waxay sababeen inay ku bara-kaceen dad lagu qiyaasay ilaa 15,000 qof. Waxaana wararku sheegayaan in ka badan 80 qof oo rayid ah inay ku dhinteen islamarkaana sida la filayo ay ku dhaawacmeen in ka badan boqolaal qof.

“Waxaan maaraynaynaa sidii gargaar loogu heli lahaa dadka tabaalaysan ee heel-nololeedkoodu liito. Waxana tallaabo hore ugu qaadnay sidii aan u kordhin lahayn gurmadka ay u baahan yihiin kuwa ay rabshaduhu soo bara-kiciyeen dhawr cisho ka hor, mana jirto wax hakad ah oo la gelinayo Barnaamijyadii dhinaca gargaarka ee hore u socday,” sidaas waxaa shaaca ka qaaday Isku-duwaha howlaha Bini'aadminnimada QM ee Soomaaliya, Mark Bowden. “Dagaallada dib uga soo cusboonaaday Muqdishu, dabayaaqadii toddobaadkan, ayaa waxa sii xumeeyeen xaaladdii ba'nayd ee dhinaca bini'aadminnimada horeba uga jirtay dalka Soomaaliya. Qiyaas baxad leh oo dadweynaha ka mid ah ayaa imminka u baahan gargaar dheraad ah.” Ayuu intaas raaciyey.

Ilaa dabayaaqadkii toddobaadkan, waxaa dadka bara-kacay la gaarsiinayey gargaar cunto ah oo lagu qeybinayey nawaaxiga deegaanka afgooye, iyadoo Barnaamijka Cuntada Adduunka(WFP) ay haatan raashin dheeraad ah u rarayso goobaha ka baxsan magaalada Muqdishu. Sidoo kale waxaa daawooyin iyo qalab kale oo gargaar ah loo qaybiyey cisbitaallada, xarumaha daryeelka hooyada iyo dhallaanka iyo rugaha bukaan-socod-eegtooyinka. Iyadoo lala kaashanayo hay'adaha aan dawliga ahayn ee gudaha ka hawlgala(NGO). Waxay hay'adda UNICEF, maacuun iyo qalabka kale ee guryaha loo isticmaalo (NFI) u qaybin doontaa ilaa 8,000 qoys oo baahi dheeraad ah qaba, waxayna sii xoojinayaan barnaamijka quudinta nafaqaynta ee imminka ku wejahan 10,000 oo carruur ah oo da'doodu ka yar tahay shanta sano, kaasoo bil walba laga fuliyo Muqdishu iyo nawaxigeeda, iyadoo dhanka kalena la sii wadi doono gargaarka deegaannada ku xeeran xeryaha dadka bara-kacay(IDPs).

Sida ay xaqiijisay waaxda la socoshada barakaca dadweynaha ee UNHCR, qiyaastii ilaa 15,000 qof, ayaa ku bara-kacay intii dagaaladaasi socdeen, iyadoo la saadaalinayo in tiradu intaas ay ka sii badan doonto. Dadka bara-kacay, ayaa gaaray degmooyinka ay xasiloonidu ka jirto ee isla magaalada, halka ay kuwo kalena u carareen nawaaxiga Afgooye, iyadoo ku biiraya in ka badan 300,000 qof oo hore goobahaas ku sugnaa. Qaar kale, ayaa iyaguna u qaxay degmooyinka deriska la ah ee Marka, Qoryooley iyo Jowhar. Dadka cusub ee bara-kacay, ayaa u baahan qalabka hoyga degdeg ah iyo gargaar cunto.

Waxay dhammaan dhacdooyinka iyaga ahi ku soo beegmeen, iyadoo ay ka sii darayso xaaladda dhinaca bini'aadminnjmada ah ee Soomaaliya ka jirta. Daraasad ay bishii August, soo saartay Waaxda daraasaadka badbaadada Cuntada ee Soomaaliya (FSAU), ayaa muuqaal naxdin leh ka bixisay, taasoo ku tilmaantay xaaladdii ugu ba'nayd oo dhinaca bini'aadminnimada ee dalka soo martay 17kii sano ee la soo dhaafay. Waxayna warbixntu tilmaantay in tirada dadweynaha imminka qaba baahida deg-dega ah ee dhinaca bini'aadminnimada ay caga-cagaynayso ilaa 3.2 milyan qof. Tani waa kororsiimo gaaraysa boqolkiiba 77 ilaa bilowgii sannadkan 2008, taasoo qiyaas ahaan u taagan boqolkiiba 43, wadarta guud ee dadweynaha.

Isku-duwaha hawlaha Bini'aadminnimada QM ee Soomaaliya, Mark Bowden, ayaa ugu baaqay dhammaan dhinacayada dagaalamaya inay xurmeeyaan sharciga Bini'aadminnimada Caalamiga ah, ayna joojiyaan gantaalaha aan loo aabba-yeelaynin ee lala beegsanayo deegaannada ay dadka rayidka ahi deggan yihiin, islamarkaana ay fursad siiyaan ama u oggolaadaan hawlaha gargaarka meelkasta oo looga baahan yahay in la gaarsiiyo. “Waxaan si adag u cambaaraynayaa falalka horseedaya tirada xad dhaafka ah ee dadka rayidka ah ee waxyeellada iyo bara-kaca loo gaystay”ayuu yiri Mr. Bowden. Isagoo intaas raaciyey “Waa arrin murugo leh in muwaadiniinta caadiga ah ee Soomaliyeed oo aan qayb ka ahayn rabshadahaas, ay si joogto ah ugu waxyeeloobayaan iska horimaadyada hubaysan iyo xaaladda nabadgalyo la'aanta ah ee dalka ka jirta.”

Faahfaahin dheeraad ah kala soo xidhiidh:: Dawn Elizabeth Blalock, Madaxa Warbaahinta Dadweynaha +254-734-210-102 or blalock@un.org; Stephanie Bunker, OCHA-New York, +1 917 892 1679 or bunker@un.org.

Xogta Af-Soomaaliga kala soo xidhiidh: Mona Mohamed, +254-733-643-73 ama mohamed26@un.org ; Haddii aad u baahan tahay Dukumenti iyo khariiddado Soomaaliya oo dheeraad ah booqo: www.ochaonline.un.org/somalia

OCHA Somalia is currently based at the OCHA Regional Office for Central and East Africa (OCHA RO-CEA), OCHA House, Gigiri Crescent, Off UN Avenue, Nairobi (Opposite UNICEF Somalia), P.O. Box 30218 Nairobi, Kenya
Tel. (254-20) 7622672; Fax (254-20) 7622632